
Kitaabka Quduuska ah ee
loogu talo galay Carruurta
Soo-jeedinayaa

# Daanyeel Maxbuuskii



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Jonathan Hay

Waxa dhaqan-geliyay: Mary-Anne S.

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2025 Bible for Children, Inc.
Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.

Danyeel iyo saddex saaxiibadii ahaa waxay ku noolaayeen Israa'iil.  Maalin baa waxaa yimid boqor weyn waddankoodii oo dhamaan wuxuu u kaxaystgay dalkiisa dhalinyaradii caqliga lahayd oo idil.  Boqrkaa wuxuu lahaa magac dheer oo ahaa Nebikadnesar – wuxuuna ku nool waddan fog oo la yiraahdo Baabuloon.



Nimankan dhalinyarada ah si fiican baa loola macaamilooday xagga Baabuloon.  Boqrku wuxuu xushay dhalinyarada ugu firfircoon ee caqliga leh ee ka kala yimid dunida daafaheeda.  Wuxuuna ku tabababaray barashada luqaddda reer Baabuloon deedna si ay u noqdaan addoomadiisa ka caawiya hawlaha maamulka boqrtooyada.




Raaashinka la siiyo aad buu u fiicnaa. Dhalinyaradu waxay cuni jireen waxa uu boqorku cuno. Laakiinse Daanyeel iyo saaxiibadii ma aysan cuni jirin raashinkaa sababta oo ah waxay gaar u ahayd caabuddida ilaahyada beenbeenta ah. Daanyeel wuxuu nidar ku galay inuusan weligii samaynin wax ka gees ah Ilaahiisa. Ilaah Israa'iil wxuuu amar ku siiyey dadkiisa inaysan waxba ku darsan ilaayahda beenbeenta ah.



Daanyeel wuxuu weyddiistay qofka horjooga u ah tababarka inuu fasax u siiyo inuusan waxba ka cunin raashinka boqorka.  Hadddii uu boqrku ogaado, aad buu u caroonayaa.  Laakiin Ilaah baa Daanayeel ugu roonaaday ninkan.




Wuxuu ku raaaca inuu Daanyeel iyo saaxiibadii tijaabiyo.  Toban cisho waa inay cunaan oo keliya khudaar oo cabaan biyo.  Maalintii ugu dambaysay Daanyeel iyo saaxiibadii way ka aragti iyo caafimaad wanaagsanaadeen dhamaan dhalinyaradii kale e cuntada boqorka cuni jirtay.  Dabadeena waxaa loo ogolaaday inay iska sii wataan cunidda khudaarta iyo cabidda biyaha.




Dhalinyaradii Ilaah bay amaaneen.  Oo Ilaahna raalli buu ka noqday iyaga.  Ilaah garasho iyo xirfado ayuu siiyey wixii ay baranayeen, oo Daanyeel wuxuu lahaa xigmad uu ku fahmo manaamyada iyo riyooyinkaba.





Ka fdib saddex sanadood oo ay ku jreen dugsigii (Iskuulkii) Babuloon, dhamaan dhalinyaradii oo idil waxaa la horgeeyey boqor Nebukadnesar.  Wuxuu ka soo dhex saartay Daanyeel iyo saddexdii saaxiibadii ahayd oo noqday kuwa ugu fiican.  Sida runta ah, boqrku waxaa u soo baxay in Daanyeel leeyahay xigmad dheeraad ah oo ka saraysa dhamaan caaqilada la taliyayaasha u ah boqortooyada.




Haben buu boqrku ku riyooday riyo xun. Wuxuu u yeertay saaxiriintii, xiddigiye iyo faalalowyada inay hortiisa yimaadaan. Boqorkiina wuxuu ku yidhi, "Riyaan ku riyoody, waxaanan la argagaxsanahay inaan ogaado waxa riyada micnaheeda yahay." Nimankii waxay ugu jawaabeen, "Boqorow waligaab noolow! Bal riyadaada noo sheeg anagoo addoomadaada ah, oo annagana waxaan kuu caddeyn doonaa fasirkeeda."



Boqorkii baa u jawaabay, “May! Waa inaad ii sheegtaan riyadii waxa ay ahayd iyo micnaheedaba. Haddaydaan ii caddeyn, waa la idin googooyn doonaa oo gurihiina waa la gubi doonaa! Laakiin haddii aad ii sheegtaan riyadii iyo micnaheeda waxa uu ahaa,” boqo wuu sii watay hadalkiisii, “Waxaan idin siin doonaa haddiyado iyo abaalgud iyo ciso weyn.”


Runtii, midkoodna nimankaa ma aysan u sheegi karayn boqorka riyadiisa.




La taliyayaashii boqrka waxay waxay ku yidhaahdeeen boqorkii, “Dhulka ma joogo nin caddeyn karaa xaalkaaga.  Ilaahyada mooyaane, kuwaasoo hoygoodu bani-aadan la jirin.”  Boqrkii aad buu u cadhooday. “Wuxuuna amray in la baabi’iyo raggii Baabuloon e xigmada lahaa oo idil.”



Markii Sirkaalkii Daanyeel u yimid, wuxuu ku yidhi Aryook, Sirkaalka boqorkow, "Muxuu boqrku u baabi'inyaa xigmadlayaasha oo idil?" deedna Aryook baa u sheegay Daanyeel waxwalboo dhacay. Daanyeel baa u tagay inuu arko boqorkii. In badan buuna weyddiistay inuu u sheegi karo boqorka rayada iyo micnaheedaba.




Dabadeed Daanyeel gurigiisii buu aaday, oo wuxuu u sheegay waxwalba saxiibadii Shadrak, iyo Meeshak, iyo Cabeednegoow. Daanyeel ma uusan garanayn waxa ay tahay riyada iyo micnaheeda toona, laakiin qof yaqaana waxwalba. Qofkaasina Ilaah buu ahaa, Daanyeel iyo saaxiibadii Ilaah bay baryeen.




Daanyeel Ilaah wuxuu tusay oo u muujiyey riyadii iyo micnaheedaba. Daanyeel Ilaaha samada ayuu amaanay, Isagoo leh, "Aman waxaa leh magaca Ilaah weligiis iyo weligiis, Waayo Isagaa leh xigmad iyo xoogba." Daanyeel wuxuu u galay boqrkii wuxuuna ku yidhi, "Waxaa jooga samada Ilaaha muujiya waxyaalaha qarsoon." Wuxuuna u sheegay boqrkii wizxii uu ku riyooday iyo riyadii fasir-keediiba.



Markii uu maqlay boqor Nebudadnesar reiyadii iyo fasirkeedii, wajigiisii u dhacay oo u sujuuday Daanyeel hortiisa oo yidhi, “Sida runta ah Ilaahaagu waa Ilaaha ilaahyada iyo Sayidka boqorada, iyo mid muujiya waxyaalo qarsoon, maxaa yeelay, waxaad awooday inaad daaaha ka qaadid qarsoodigan!”



Markaasaa boqorkii Daanyeel darajeeyey oo nin weyn ka dhigay. Oo wuxuu siiyey haddiyado badan. Wuxuuna ka dhigay taliyaha madaxda u ah gobolada Baabuloon oo idil, iyo madaxa ragga xigmadda leh oo idil.



# Daanyeel Maxbuuskii

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Daanyeel 1, 2

"Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiyaa." Sabuurka 119:130

Dhammaad

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16